

Macluumaad ku saabsan Isbadalka Public Charge (Dulsaarka Shacabka)

Waa maxay “Public Charge (Dulsaarka Shacabku)”?

Saraakiisha laanta socdaalka ayaa adeegsada weedha Public Charge (Dulsaarka Shacabka) taas oo ka dhigan dadka isku ku tiirsan taageerada dawlada. Haddii ay dawladu go’ aamiso in qofku uu yahay “Public Charge (Dulsaarka Shacabka)”, waxaa loo diidi karaa inuu yimaado Maraykanka ama waxaa loo diidi karaa in daganaanshao rasmi ah lasiiyo.



Public Charge (Dulsaarka Shacabka) ma khuseyso noocyo badan oo soo galaytiga ah

Kuwani waa koox **aanu**saamaynaynin isbadalku:

- Qaxootiga iyo magan galyo doonta
- Dadka ka badbaaday tahriibinta dadka iyo danbiyada kale ee aadka u daran
- Dadka dalbaday badbaadin sida uu dhigayo Sharciga La Dagaalanka Tacadiga Dumarka
- Dadka dhalinyarta ah ee haysta xaalada “soo galaytiga gaarka ah ee caruurnimada”

Public Charge (Dulsaarka Shacabka) ma saamayn doono barnaamijyo kale oo badan

Barnaamijyadan **ma** saamaynayo:

- Medicaid caruurta ka yar 21 jirka iyo dumarka uurka leh (oo ay ku jiraan 60 maalmood kadib dhalmada)
- CAWEM Medicaid Degdeg ah, caymiska gaarka ah ee dumarka uurka leh
- Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Caruurta, CHIP
- Barnaamijka Nafaqada Gaarka ah ee Dumarka, Sabiyada iyo Caruurta, WIC
- Adeegyada waxbarashada gaarka ah ee hoos yimaada Medicaid iyo kuwa ay maalgaliyaan Sharciga Shakhsiyaadka Laxaadka La’, IDEA
- Sicir dhimista caymiska caafimaadka gaarka ah ee laga heley Suuqa Caymiska Caafimaadka Oregon
- Daryeelka caafimaadka ku salaysan dugsiyada
- Barnaamijka Caruurta Dhan ee Saymiska ee Oregon
- Badanaa Barnaamijkada Caafimaadka Taranka ee Oregon lagu bixiyo



Macluumaad ku saabsan Isbadalka Public Charge
(Dulsaarka Shacabka)



Degmada Multnomah, Cid Walbaaba Way Iman Kartaa.

Hadii aad u aragto in sharcigan
isbadalkiisu uu ku saamayn
karo, waxaad ogaataa
macluumaad dheeraad ah oo la
xidhiidh looyarka soo galaytiga.

Shaqaalaha Degmada Multomah ma bixin
karto talo sharci ah, laakiin khayraadka
hoose ayaa ku caawin kara.

Wixii khayraadka sharciga ah, booqo
oregonimmigrationresource.org ama
protectingimmigrantfamilies.org

Wixii su' aalo ah ee ku saabsan
gunooyinka iyo ku biirida, la hadal
Khadka Tooska ah ee Gunoooyinka
Shacabka ee Xarunta Sharciga Oregon
iyo Adeegyada Kaalmada Sharciga ee
1-800-520-5292.

